

Xaqiiqda Cudurada Galmada (STD)

Hepatitis: Type A

Cagaarshow (Joonis): Nooca A (uu keeno fayraska loo yaqaan hepatitis A)

CALAAMADAHA LAGU GARTO

Calaamadaha Cagaarshow-ga Nooca A:

- Waxay bilawdaan 15-50 maalmood ka dib marka cudurka la qaado
- Qandho (xummad)
- Cuntada oo aad niyad u weydo
- Xanuun yar oo aad caloosha ka dareento
- Indhaha iyo maqaarka oo noqda jaalle
- Kaadida oo yeelata midab madow xigeen ah ama saxarada oo yeelata midab khafiif ah
- Lalabo ama matag
- Daal

ISU GUDBINTA

Cagaarshow-ga Nooca A waxaa Fidiya:

- Iyadoo saxaro cudurka qabtaa ay gaadho afka (fecal-oral transmission) ama iyadoo cunto uu ku jiro fayraskan la cuno (food-borne transmission)
- Galmada aan caadiga ahayn

DHIBAATOYINKA KA YIMAADA CUDURKAN

Cagaarshow-ga Nooca A:

- Ma keeno waxyeello raagta oo soo gaarta beerka, sida badanna ma keeno dhimasho
- Qofku ma noqon karo cudur-side joogto ah (chronic carrier)
- Cudurka oo mar kugu dhacaa waxay keentaa in aanu mar dambe kugu dhicin noloshaada

KA HORTAGGA

Talooyin ku Saabsan Sida loo Yareeyo Fiditaanka Cagaarshowga Nooca A:

- Dhaq gacmahaaga markaad saxarootaba
- Ha samayn galmo aan caadi ahayn
- Is tallaal
- Daawada loo yaqaan immune globulin ayaa lagugu duri karaa 14 maalmood gudahood laga bilaabo marka cudurkani ku soo gaaro

DAAWEYNTA

Sida Wax looga Qabto Cagaarshowga Nooca A:

- Ma jirto daawo wax ka tari karta soo gaabinta muddada uu socdo lahankaca deg-degga ah ee uu keeno cudurkani

WIXII WARAR DHEERAADA, LA XIRIIR:

Infectious Disease Epidemiology, Prevention and Control Division

Minnesota Department of Health

P.O. Box 9441

Minneapolis, Minnesota 55440-9441

(612) 676-5414; (612) 676-5653 TTY

Khadka Teleefonka ee Qorshaynta Qoyska iyo Cudurada Galmada (STD) ee Minnesota (Minnesota Family Planning and STD Hotline) 1-800-783-2287 Teleefonka caadiga ah /TTY

Khadka Taleefonada Hay'adda Qaranka CDC Qaybta Qaabilsan Cudurada STD iyo AIDS (CDC National STD and AIDS Hotlines)

1-800-227-8922 ama 1-800-342-2437

1-800-243-7889 TTY

1-800-344-7432 (Isbaanish) (Spanish)

www.ashastd.org

Khadka Teleefonka Hay'adda CDC Qaybta Qaabilsan Cagaarshowga (CDC Hepatitis Hotline) (404) 332-4555